Toosinta iyo Casriyaynta Haybta Shakhsiga Soomaaliyeed

W/Q Cabdalla Cumar Mansuur

Janaayo 10, 2018

Mucda Qoraalka

Si loola jaanqaado dunida maanta horumartay waxaa loo baahan yahay in qofka Soomaaliyeedi uu lahaado waxyaabo lagu aqoonsado, oo afafka shisheeye lagu yiraahdo "ID", annaguna qoraalkan aan u adeegsannay ereyga "hayb", iyadoo la raacayo hab midaysan, oo casriyaysan, lana ilaalinayo nidaamka diinta iyo dhaqanka Soomaaliyeedba. Haddaba waxaan halkan ku qaadaadhigaynaa haybta qofka Soomaaliyeed oo u baahan in la turxaanbixiyo waxyaabaha lagu aqoonsado, sida: magaciisa gaarka ah, 'magaca qoys'-kiisa, taariikhda dhalashadiisa iyo deegaanka uu ku dhashay. Maqaalkani waxa uu horey ugu soo baxay ***Somali Studies:*** *A Peer-Reviewed Academic Journal for Somali Studies, Volume 2, pp. 125-140, Somali Studies, 2017.*



I. Midaynta Hab dhigaalka Magaca Gaarka ah

Waa in la xasiliyaa jahawareerka innaga haysta xagga hab dhigaalka magacyada gaarka ah, oo siyaabo kala duwan loo qoro. ***1***

1. *Magacyo asalraac ah*: Marka la adeegsanayo farta Soomaaliga, magacyada asal ahaan ka soo jeeda af Carbeedka, saddex siyood ayay af Soomaaliga uga mid noqdeen, iyagoo loo qorayo sida loogu dhawaaqo:

Copyright © 2018 WardheerNews, All rights reserved

a) Kuwo sida asalkoodu ahaa loogu dhawaaqo, sida: *Haaruun, Hinda, Khadiija, Cali, Yuusuf, Xasan* iwm.

b) Kuwo wax yar isbeddel codeed ku dhacay, sida: *Axmed* (af Carbeedka: Axmad), *Xuseen* (Xuseyn), *Aadan* (Aadam), *Maxamed* (Muxammad).

c) Kuwo isbeddel weyn ku dhacay, oo siyaabo kala duwan loogu dhawaaqo gobollada Soomaaliyeed, sida magaca Carbeed "Abuu Bakar" oo noqday: *Abokor, Abuukar, Abiikar, Eybakar, Bakar, Iikar*. Magaca "Cabdullaahi" isna wuxuu noqday: *Cabdulle, Cabdille, Cabdalle, Cabdalla, Cabdullaahi, Cabdillaahi*.

Haddaba, nidaamkan aan kor ku soo xusnay, oo waafaqsan codaynta af Soomaaliga, oo horeyna u dhaqangalay, ilama habboona in la beddelo, laguna qoro hab Carbeedka asalka ah, sida dadka qaarkood ay bilaabeen in magacyadooda ay u qoraan, sida: magaca *Xuseen* oo ay u qoraan Xuseyn; *Maxamed* oo ay u qoraan Muxammad; *Aadan*-na Aadam iwm. Haddii aan raacno aragtidan asalraaca ah, maxaan ka yeelnaa magacyada, sida magacyada asalkooda ka soo jeeda "Abuu Bakar" (*Abokor, Abuukar, Abiikar, Eybakar, Bakar, Iikar*)? Giddigooda ma "Abuubakar" baan u qornaa? U malayn maayo in ay sax tahay.

2. *Magacyo jacbur ah*: Sidoo kale, waxaa soo badanaya dad magacyadooda ku qora far jacburan, farta af Soomaaliga iyo midda Ingiriisiga oo isku laran, sida: *Khaliif Abdullahi*; *Mohamed Xaashi*; *Abdinaciim* iwm. Arrintanna in laga fiirsado ayaa loo baahan yahay.

3. *Magacyo qoraalkoodu aanu iswaafaqsanayn*: Waxaa jira magac qof Soomaaliyeed, oo afar hab loo qoro, sida hogatus ahaan, aan halkan ugu muujinayno qof magaciisu yahay *Nuur Xuseen Cabdirashiid* iyo siyaabaha kala duwan ee loo qoro, oo ku xiran hadba dalka uu joogo qofkaas.

    1. *Nuur Xuseen Cabdirashiid (far Soomaali)*
    2. *N**u**r **H**uss**e**n **A**bdira**sci**d (f. Talyaani)*
    3. *N**oo**r **H**uss**ei**n **A**bdira**shi**d (f. Ingiriisi)*
    4. *N**ou**r **Ho**uss**ei**n **A**bdira**chi**d (f. Faransiis)*

Arrintani waxay qofka u keeni kartaa dhib weyn, gaar ahaan, xagga waraaqihiisa aqoonsi oo leh magacyo is khilaafsan, sidaasna lagu aqoonsan kari waayo. Qurbajoogta ayaana aad u garan karta dhibaatadan iyo ciddii dibadda xiriir la leh.

> Sidoo kale, ardayda wax ku barata gudaha dalka Soomaaliyeed, badiba waxaa dhacda in shahaadada dugsiga sare magaca qofku ku qoran yahay far Soomaali iyo far Carabi, shahaadada heerka jaamacadeedna isla sidaas loo qoro. Laakiin marka uu baasaboor doonto, badiba waxaa magaciisa lagu qoraa far Ingiriisi.
> Marka uu dalka dibaddiisa u doonto waxbarasho heerka labaad ee jaamacadda ah, waa lagu soo celiyaa dukumentigiisa, waxaana loo sheegaa inuu qoraalka magacyadiisa isa soo waafajiyo.[2]

Bal haddana aan milicsanno adduunweynaha kale iyo dhigaalka magacyada. Waxaan ogsoonnahay in farta *Latin*-ka ay adeegsadaan reer Galbeedka badankooda iyo kuwo kaleba, sida: *Indonesia, Vietnam,*

Turkida iwm, iyagoo afafkoodu ay ku kala geddisan yihiin xagga ku dhawaaqidda xuruufaha qaarkood, haddana qola waliba waxay magaceeda ku qortaa habka fardhigaalkeeda u gaarka ah oo keliya.

Qaar ka mid ah afafkaas adeegsada farta Latin-ka, oo leh xuruufo ay ku kala duwan yihiin xagga dhawaaqa, ayaan hogatus ahaan halkan ku soo bandhigaynaa:

- Polish-ka xarafka **c** dhawaaqiisu waa z; **ch** = h.
- Ingiriisiga: **c** = s/k; **ch** = j.
- Talyaaniga: **c** = j/k; **ch** = k.
- Turkish-ka: **ç** = ch (chair).
- Jarmalka: **ch** = kh (Munich).
- Faransiika: **ch** = sh.
- Indonesia: **sy** = sh.

Maadaama, farta af Soomaaligu ay la mid tahay midda reer Galbeedka, oo ay leedahay saddex xaraf (**c**, **x**, **q**)[3] oo ku dhawaaqooda si kale ah, maxaa inoo diidaya, sida dadyowga kale ee dunidu ay ugu dheggen yihiin hab dhigaalkooda, in aan innaguna ugu dhegganaanno keenna, oo aan u qorno magacyadeenna habka farta Soomaaliga oo keliya?

Sida cid waliba ay farteeda ugu talaggasho dadkeeda, oo aan waxba ka khusayn u fududaynteeda dadka shisheeye, ayaa farta af Soomaaligana loogu talaggalay Soomaalida. Sidaa darteed, qofka ajnabiga ah waa ku khasban yahay in uu raaco ama dhowro habka qorista afkeenna, sida aan giddigeenba u dhowrno hab qorista afafka shisheeye.

Copyright © 2018 WardheerNews, All rights reserved

Haddii innagu aynaan noqon dad shaqsiyad leh oo isku kalsoon, qiimana u yeela afkooda iyo fartooda gaarka ah, maxaa laga sugayaa qofka shisheeye? Qofka afkiisa hooyo liida shakhsiyaddiisii ayuu liiday.

Tanina waxay ka mid tahay arrimaha keeni kara in qofku uu mudnaan dheeraad ah siiyo afshisheeye. Arrintanna waxaa tusaale u ah, sida maanta ay Soomaalidu u adeegsato af Ingiriisiga, dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba.

Weli mararka qaarkood waxaaba qurbaha lagu arkaa marka uu magac far Soomaali ku qoran yahay, dadka ajaanibka ahi sida la toosan ayay ugu dhawaaqaan, Soomaaliduna inay hagaajiyaan daaye, sida khaladka ah ayay isugu yeeraan, iyagoo isku dayaya in ay u fududeeyaan ajnabiga, liidayana habka Soomaaliga ee saxda ah. Tus.: magaca *Nimco > Nimko* ayay qaarkood ugu dhawaaqaan, *Axlaam > Akslaam, Maxamed > Maksamed* iwm. Weliba mararka qaarkood waxaa la maqlaa magaca *Maxamed* oo la soo gaabiyay, looguna dhawaaqayo qaab reer Galbeed, sida *Max* (oo loogu dhawaaqo Makis) iwm[4].

Haddaba, si loo mideeyo hab dhigaalka magaca gaarka ee Soomaaliyeed waxaa loo baahan yahay in si midaysan aan u adeegsanno farta af Soomaaliga, mar walba iyo meel kasta oo aan dunida kaga sugannahay.

Sidaas darteed, magacii aan kor ku soo xusnay, waxay noqonaysaa in mar walba loo qoro "*Nuur Xuseen Cabdirashiid"* dukumentiga lagu qorayaa afka kasta oo uu ku qoran yahayba, sida af Ingiriisi, Talyaani, Swedish iwm.

II. Magaca Qoyska (*Magacqoys*)

Magac gaar, sidiisaba, waa astaan lagu aqoonsado qof, dal iwm oo looga soo sooco dadka iyo dalalka kale, sida magacyada gaarka ah ee juqraafiyeed: *Muqdisho, Hargeysa, Kenya, London* iwm. Sidaas ay tahay, way dhici kartaa in tiro kooban oo magacyo gaar ahi ay isku mid noqdaan ama isu dhowaadaan. Laakiin magacyada gaarka ee dadka Soomaaliyeed, intooda badani aad ayay isugu egyihiin. Tusaale ahaan, haddii aad cid weydiiso, "Yaa yaqaan *Maxamed Cabdullaahi*?" waxaa markiiba lagu weyddiinayaa: "*Maxamed Cabdullaahigee*?" oo la rabo in aad sheegto, si loo garto, naanaystiisa ama cidda uu ka dhashay.

Qoraal ahaanna, Soomaaliya kama jira nidaam midaysan ee qofka magaciisa loo qoro. Hay`adaha waxbarashadu xilliyada la gelayo imtixaannada shahaadada [sannadka 8aad iyo 12aad] waxay faraan in ardaygu qoro afar magac, sida: *Nuur Xuseen Cabdirashiid Faarax*;

hay`adaha garsoorkuna qofka magaciisa saddexan waxay raaciyaan magaca hooyadiis, sida: *Nuur Xuseen Cabdirashiid,* ina *Faadumo Xasan.* hay'adda socdaalkuna waxay baasaboorrada ku qoraan qofka magaciisa oo seddaxan oo weliba ku qoran farta Ingiriisiga.

Arrintanina waa caqabad lagala kulmo dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba, taasoo la xiriirta magacyada Soomaaliyeed, oo badanaa aan lahayn wax lagu sii kala sooco, sida hab magac gaareedka aadka looga adeegsado adduunweynaha, oo af Ingiriisiga lagu yiraahdo "*surname*", af Carbeedkana "اسم العائلة" (*magacaqoyska*). Waxaana si gaar ah u dareemaya caqabadda *magacqoys* la'aanta Soomaalida qurbajoogta ah iyo ciddii xiriir la leh reer Galbeedka.

Inkastoo aanay Soomaalidu dhaqan u lahayn adeegsiga *magacqoyska*, waxaa haddana lagu khasbaa, marka dibadda la joogo, in ay yeeshaan *magacqoysyo* uu dal kasta u dhigay hannaankiisa u gaarka ah. Waxaan halkaan ku muujinaynaa siyaabaha kala duwan ee dalalka qaarkood ay u siiyaan Soomaalida ***magacqoysyo***, annagoo adeegsanayna qof magaciisu yahay: *Maxamed Cali Cabdullaahi* (sida ay Soomaalidu u adeegsato). Bal eeg, sida uu isu rogo qofkaas magaciisa haddii uu ku sugan yahay:

- Dalka Ingiriiska: *Maxamed* ***Cabdullaahi*** (*magacqoyskuna* waa midka **3d,** waxaana meesha ka baxaya magaca aabbaha)
- Dalka Talyaaniga: *Maxamed* ***Cali Cabdullaahi*** (*magacqoysku* waa midka **2d** & **3d**)
- Dalka Sweden: *Maxamed* ***Cali*** (*magacqoysku* waa midka **2d,** ama aabbaha)

Hababkan magacqoyseed ee kala geddisan siyaabo badan ayay uga soo horjeedaan habka, dhaqan ahaan, ay Soomaalidu u adeegsato magacyada gaarka ah, waxaana ka mid ah: ubad iyo aabbihiis ayaa u muuqanaya laba walaalo ah, sida aabbaha magaciisu noqday *Maxamed* ***Cabdullaahi,*** inantiisuna waxay noqonaysaa *Caasho* ***Cabdullaahi***. Midda kale, magacqosyada Talyaanigu waxay u badan yihiin in la hormariyo, qofka magaciisana gadaal la mariyo, isagoo gala kaalintii magaca awoowaha Soomaaliyeed, sida magaca *Maxamed* ***Cali Cabdullaahi*** waxaa loo qoraa ***Cali*** ***Cabdullaahi*** *Maxamed*. Bal ka warran, dhibaatada ka imaan karto, haddii magacyadaas aan la tagno geyiga Soomaaliyeed.

Dalka gudihiisana, hay`adaha waxbarashadu xilliyada la gelayo imtixaannada shahaadada [sannadka 8aad iyo 12aad] waxay faraan in ardaygu qoro afar magac, sida: *Nuur Xuseen Cabdirashiid Faarax*; hay`adaha garsoorkuna qofka magaciisa waxay ku raaciyaan magaca

Copyright © 2018 WardheerNews, All rights reserved

hooyadiis, sida: *Nuur Xuseen Cabdirashiid, ina Faadumo Xasan*.

Haddaba, si laysu waafajiyo labada hab, *magacqoysyada* jahawareerka leh ee ay ina siiyaan reer Galbeedku, oo iyaguba aan ku midaysnayn habka ay adeegsadaan, iyo casriyaynta hab magaceedka ay Soomaalidu isu taqaan, waxaan yeelan karnaa *magacqoysyo* maangal ah, oo dhaqankeennana waafaqsan.

Marka hore, aan wax yar dib u milicsanno taariikhda iyo sababaha keenay *magacqosyada* ay adeegsadaan dadyowga kala duwan ee dunida daafaheeda kala deggan. Adeegsiga *magacqoysyadu* waa nidaam soojireen ah, oo ay adeegsan jireen qoysaska gobta lagu sheego, ee boqorrada lahaa.

Qarnigii 11-12aad, ayay Yurub billawday in dadka caadiga ah loo yeelo *magacqoysyo* cusub, si ay u diiwaangeliyaan dadweynaha tarankoodu ku batay magaalooyinka, isla markaana ay adkaatay in magacyadooda la kala saaro, *magacqoys* la'aan awgeed. Xilligan casriga ah, dawladaha bilaabay adeegsiga *magacqoysyada* waxaa ka mid ah: *Netherlands (1811), Japan (1870), Thailand (1920), Turkey (1934) iyo Afganistaan (2014).* [5] Dadyowgaas iyo kuwa kale oo dunida daafaheeda kala deggan, oo aan isku dhaqan iyo isku af ahayn, ayaa wada qaatay in qofka magaciisa la raaciyo magac tilmaan gaar ah bixinaya, kaasoo ah *magacqoyska*. Tilmaamahaasina waxay u badan yihiin afar nooc, oo kala ah:

1. Degaanka uu ka soo jeedo: *Bush* (duur), *Yamamoto* (Japan, buur gunteed), *Bukhaari* (magaalada Bukhaaraa), *Kapoor* (Hindi, magacrugeed ab), *Jiang* (China, webi), *Moskva* (reer Mosco).
2. Xirfaddiisa: *Smith* (tumaal), *Al-Najaar* (najaar/faryaame).
3. Sifihiisa: *Brown* (USA, midab bunni), *Tolstoy* (Russia, buurane), *Al-axmar* (Yaman, guduudow/casoowe), *Dogan* (Turkey, galleyr), *Gao* (China, dheer).
4. Qofka isirkiisa: oo ah habka ugu qaddiimsan, oo laba nooc ah:
    a) Magaca beeshiisa: *Aala Nahyaan* (magac reer Carbeed), *O'Brien* (Irish, *O'*=reer, Brien = magac beel), *Wang* (China), *Kim* (Korea), *Oğlu* (Turkey).
    b) Magaca abkiisa: Carabta & Yahuudda: ***Ibn*** *Khalduum,* ***Bin*** *Laadan,* ***Bin*** *Goryan,* ***Abu*** *Mazen.* Reer Galbeedkuna wax la mid ah ayay leeyihiin, sida: ***P****owell* (oo ka yimid: ***ap*** Hywel = ina Hywel), ***Mac****Neill* (ina Neil), *Ivan****ov*** (Russia, ina Ivan), *Wilson* (ina William), ***Fitz****gerald* (*Fitz* < filius (*Latin*), ina Gerald), *Pál****fi*** (Hungarian, ***fi*** (ina) Paul).

Haddaan sii baarno habkan dambe, waxaan arkaynaa in magacyadan ay ka joogaan abtirsi la soo gaabiyay, tus.: Carabta: magaca ***Ibnu Taymiyah*** asalkiisu waa *Axmad bin Cabdulxaliim bin Cabdisalaam bin Cabdalla bin Abiilqaasim bin Muxammad* ***ibnu Taymiyah***. Reer Galbeedka, gaar ahaan Welsh [6] -ku, sida Carabta ayay u abtirsan jireen, iyagoo adeegsanaya qurubka ***ap*** (oo la micna ah *ina* ama *ibna*), tus, magaca *Llywelyn Gruffydd****s,*** asalkiisi hore, wuxuu ka soo jeedaa abtirsigan, oo marba isbeddel ku dhacaayay: *Llewelyn* ***ap*** *Dafydd* ***ap*** *Ieuan* ***ap*** *Griffith* ***ap*** *Meredith > Llywelyn* ***ap*** *Gruffydd > Llywelyn Gruffydd****s***, ugu dambayntiina qurubka ***ap*** wuxuu isu dhalanrogay dibkabaha "**-s**" [7] , haseyeeshee mararka qaarkood qurubka ***ap*** wuxuu noqonayaa horkabe kooban, sida *magacqoyska* ***P****owell* (oo asalkiisa ka yimid ***ap****+ Haywel*).

Raadka abtirsiga kama marna xitaa magacyada reer Galbeedka ee maanta la adeegsado, sida magacyada madaxweynayaasha ee soo socda, tusaale ahaan:

- ***François Hollande*** *<****François*** *Gérard Georges Nicolas* ***Hollande***
- **George Bush < George** Herbert Walker **Bush**

Afarta hab magacqoyseed ee adeegsigooda ugu badan ee aan kor ku soo qaadaadhignay, markii laga reebo midka afaraad oo ah qofka isirkiisa, seddaxda kale waxay ka soo jeedaan *naanaysyo* la xiriira qofka degaankiisa, xirfaddiisa iyo sifadiisa. Haddaba, naanaysyada faraha badan ee ay Soomaalidu leedahay sow astaan uma aha baahida loo qabo *magacqoyska*? Waa tii horey loo yiri *Nin aan naanays lahayn waa ri' aan geeso lahayn*[8]. Sida la wada ogyahay, naanaysta ayaa ka xoog badan qofka magaciisa oo seddaxan, maxaa yeelay ayada ayaa markiiba lagu aqoonsan karaa qofka. Tus. magacyadan soo socda oo aan la socon naanaysyo, waxaa laga yaabaa in aan durbadiiba la fahmi karin qofka loola jeedo, maxaa yeelay dad badan ayaa la wadaagi kara: *Maxamed Cabdullaahi Maxamed, Maxamed Ibraahim Warsame, Xuseen Sh. Axmed, Axmed Maxamed Maxamuud, Axmed Faarax Cali, Khadiija Cabdullaahi.* Haddiise magacyadan la raacsiiyo naanaysyada soo socda ama la sheego naanaysyada oo keliya, durbadii waa la garanayaa qofka loola jeedo: *Axmed Maxamed* ***Siilaanyo****, Maxemed Cabdullaahi* ***Farmaajo****, Maxamed Ibraahim* ***Hadraawi****, Xuseen Sh. Axmed* ***Kaddare****, Axmed Faarax* ***Idaajaa****, Khadiija Cabdullaahi* ***Dalays.***

Haddaba, maxaa inoo diiday in innaguna aan yeelanno *magacqoysyo* ku qaabaysan dhaqankeenna, si aan ula jaanqaadno caalamka intiisa kale, oo Muslin iyo dad aan Muslin ahaynba ka kooban, oo badankoodu ay wada adeegsadaan habka *magacqoyska*?

Copyright © 2018 WardheerNews, All rights reserved

Maadaama dhaqan ahaan aanu leenahay abtirsiimo, qabaa'il iyo naanaysyo aan qaarkood xumayn, waxaan tala ahaan soo jeedin lahaa sidan soo socota:

1. In aan adeegsanno *'magacqoys'* oo laga keeno: *magac reer* ama *magac ab* (oo aan adeegsigiisu badnayn)[9], ama *naanays fiican,* ama *magac degaan,* ama *magac xirfad* iwm.
2. Si ubad iyo aabbihiis aan walaalo u noqon, waxaa habboon in 3 magac la qaato, kuwaas oo kala ah: *qofka magaciisa + magaca aabbihiis + magaca qoyskiisa.*
3. In magac sharafeedyada, sida: *macallin, shiikh, xaaji* iwm, qoraal ahaan aan la raacsiin magaca, gaar ahaan marka magaca lagu qorayo dukumentiyada (warqadda aqoonsiga, baasaboorka, warqadda dhalashada, shahaadooyinka waxbarashada iwm).
4. In magacyada lammaanan ee Soomaalida qaarkood ay leeyihin, sida: *Maxamed-Deeq, Caasha-Kiin* iwm, oo mid kastaa kelidiis magac noqon karo, in midkood rasmi laga dhigto, oo lagu kaaftoomo marka magaca lagu qorayo dukumentiyada, ama in labada magac loo dhexeysiiyo jiitin, si aan loogu khaldin magaca labaad in uu yahay magaca aabbaha, sida: Maxamed-Nuur.
5. In dawladda Soomaaliyeed ay si dhab ah ugu dhabbagasho sidii looga baaraandegi lahaa arrintan, loona hirgelin lahaa casriyaynta magacyada dadka Soomaaliyeed.

Waxaan tusaale ahaan halkan ku soo bandhigaynaa magacyo niman Soomaaliyeed oo caan ah, oo giddigoodba leh naanayso aan xumayn oo si fudud lagu aqoonsado nimankaas. Maadaama naanaysyadaasi ay

waafaqsan yihiin afarta hab *magacqoyseed* ee aan kor ku soo xusnay, waxay tusaale muuqda u noqon karaan sida loo samayn karo *magacqoysyo* Soomaaliyeed.

1) <u>Magaca isirka:</u>
   a. <u>Magaca abka</u>:
      - *Yaasiin Cismaan* ***Keenadiid***[10] (Keenadiid waa awoowgiis)

   b. <u>Magaca reerka</u>:
      - (Sh.) *Cabdulaahi Yuusuf* ***Qudubi*** (***Qudubi*** magac beeleed)
      - (*Sh.*) *Cabdiraxmaan Cumar* ***Celi*** (***Celi*** waa magac beeleed)

- (*Dr.*) *Saalax Caydaruus* ***Alcamuudi*** (***Al-Camuudi*** waa magac beeleed)

2) Magaca degaanka:
   - *Maxamed Cusmaan* ***Jawaari*** (*Jawaarey* waa magac degaan)
   - *Faarax Maxamed* ***Gololey*** *(Gololey* waa magac degaan*)*

3) Magaca sifada/naanaysta qofka: **11**
- *Aadan Cabdulle* ***Cadde***
- *Axmed Maxamed* ***Siilaanyo***
- *Maxamed Ibraahin* ***Hadraawi***

4) Magaca xirfadda:
- *(Sh) Xasan Axmed* ***Faqi***[12]
- *Cabduraxmaan Nuur* ***Garaash***[13]

Haddii habkan iyo wax u eg la qaato waxay arrintu noqon lahayd *hal dhagax afar shimbir ku dil,* yacnii afar mushkiladood ayaa sidaas lagu xallin kari lahaa ama lagu yarayn lahaa, kuwaas oo kala ah:

1. Waxaa yaraanaya magacyadii isu ekaa.
2. *Magacqoysyadii* qallafsanaa ee ay reer Galbeedku qurbajoogta ku khasbeen ayaa meesha ka baxaya.
3. Waxaa caadi noqonaya adeegsiga magacyada isirka ama qabiilka. Taasina ceeb iyo wax laal yaabo midna maaha, waayo, qabiilku waa wax la isku aqoonsado, sida ku xusan Quraanka Kariimka ah, suuratul Xujuraat, aayadda 13aad:

...يٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنَّا خَلَقْنَٰكُم مِّن ذَكَرٍ وَأُنثَىٰ وَجَعَلْنَٰكُمْ شُعُوبًا وَقَبَآئِلَ لِتَعَارَفُوٓا۟ ...الحجرات: ٣١

(*…Oo waxaan idin ka dhignay ummado iyo qabaa'il si aad isu aqoonsataan...*) *Al-Xujuraat: 13*

Sidaa darteed, *magacqoys* waxaa Carabta u ah magaca qabiilka ay ka dhasheen, sida: *Baa-sarca, Al-Camuudi, Aal-Nahyaan, Aal-Sacuud, Baa Cumar,* iwm.

Copyright © 2018 WardheerNews, All rights reserved

4. Waxaa sidaas ku haraya ama yaraanaya naanaysyadii xumaa, oo diinta Islaamku aan oggolayn, sida ku cad Quraanka Kariimka ah, suuratul Xujuraat aayadda 11aad:

الحجرات :١١ ...ۖ ﴿ ... ﴾

(… ***Hana isugu yeerina naanayso xunxun, waxaa xun magaca faasiqnimada iimaan kaddib…*****) *Al-Xujuraat: 11***

III. Taariikhda iyo Degaanka uu Qofku ku Dhashay

Soomaalidu dhaqan uma lahayn in ay meel ku qoroto taariikhda dhalashada, gaar ahaan lama tixgeliyo maalinta iyo bisha uu qofku dhashay, sida ku cad baasaboorrada iyo waraaqaha aqoonsiga ee laga sameeyey geyiga Soomaaliyeed. Markii dibadda loo qaxay waa tii Soomaalida badankeedu ay ka dhigatay taariikhda dhalashadeeda kowda Jannaayo (01/01…). Xitaa sannadku wuxuu u badan yahay mala'awaal ama mid aan sugnayn, qofku da'diisa marna wuu yareeyaa marna wuu weyneeyaa, waxayna ku xiran tahay hadba xaajada uu markaas doonayo in uu ku fushado. Haddaba, si loola jaanqaado dunida casriga ah ee maanta waa lagama maarmaan in qof waliba uu lahaado taariikh dhalasho oo dhan (maalinta, bisha iyo sannadka).

Sidoo kale, degaanka uu qofku ku dhashay, isna waxaan aragnaa in Soomaalidu aan sidaas u danaynayn, oo waxaa la arkaa in dadka badankoodu ay qortaan in ay ku dhasheen Muqdisho ama meel kale oo aan dhab ahayn. Haddaba, waxaan ku talin lahaa:

1. Ciddii aan lahayn taariikh dhalasho ee sugan, waxaa habboon in lagu dadaalo sidii loo samaysan lahaa, taariikh dhalasho oo maangal ah, lagana gudbo habka la caadaystay, oo ah in laga wada dhigto kowda Jannaayo (01/01/….);
2. In lagu dadaalo in jiilka cusub taariikhdooda dhabta ah la qoro, lana xifdiyo; iyo
3. In degaannada Soomaaliyeed loo yeelo xeer adag, oo ah in warqad dhalasho la siiyo hooyadii ku umusha degaan, sida adduunweynaha kale ay sameeyaan, kaddibna warqaddaas laga diiwaangeliyo dowladda hoose, si loo ogaado taariikhda (maalinta, bisha iyo sannadka) iyo goobta uu ilmuhu ku dhashay.

Gabaggabo

Sida sawirka wejigu uu u yahay wax isla markiiba qofka ka soo soocaya dadka kale, ayaa sidoo kale qoraal ahaan waxaa qofka Soomaaliyeed haybtiisa saxda ah lagu aqoonsan karaa marka uu leeyahay saddexdan tilmaamood:

1) Qofka magaciisa iyo ka aabbihiis oo saxan;
2) *magacqoys* u gaar ah, oo ku salysan dhaqanka Soomaaliyeed; iyo
3) taariikhda (maalinta, bisha iyo sannadka) iyo degaanka uu qofku ku dhashay oo sugan.

Saddexdan tilmaamood, siiba labada hore, waxaa suurtagelin kara, hadday noqoto iskuxirnaantooda iyo xaqiijintoodaba, marka qofka Soomaaliga ahi haybtiisa shaqsiyadeed uu ku qoro far Soomaali, mar walba iyo meel kasta oo uu dunida kaga sugan yahay. Markaasna waxaa suurtaggalaysa in laga gudbo: magacyada dhigaalkoodu is khilaafsan yahay, ee la caadaystay in lagu qoro faro aan islahayn; qaabka saddexda magac ee keenay in dad aad u badan ay isku magac noqdaan; *maqacqoysyada* hababkooda kala duwan ee nalagu khasbay. Sidoo kale, naanaysyadii foosha xumaa ayaa haraya ama yaraanaya, waxaana kaalintooda gelaya '*magacqoys'-yada* noocyadooda kala duwan.

<u>Tilmaamo</u>

1 Waxaa mahad gaar ah iga mudan aqoonyahannada gacanta igu siiyay diyaarinta maqaalkan, oo kala ah: *Idiris M. Cali* (*USA*), *Saynab A. Sharci (UK), Giorgio Banti (Italia), Cabdirashiid Maxamed Ismaaciil (Jabuuti), Maxamed Xasan Nuur (Muqdisho), Mustafa Cabdullaahi Fayruus (Muqdisho).*

2 Arintan waxaa nooga waramay Dr. Maxamed Xasan Nuur oo ah Diiwaanhayaha Guud ee Jaamacadda Muqdisho.

3 Xarfaha "dh"& "kh" halkan kuma darin, maxaa yeelay lama mid aha saddexdaas xaraf ee matalaya codad aad uga geddisan sida caadi ahaan loo adeegsado.

4 Warkan dambe waxaan si toos ah uga helay macallimad Saynab A. Sharci oo ku nool dalka UK.

Copyright © 2018 WardheerNews, All rights reserved

[5] Sannadka 2014 ayay bilaabeen reer Afganistaan in ay yeeshaan, magacqoys iyo taariikh dhalasho, sida uu qoray Kapul Journal: *Obstacles Beyond Number for the Afghan Census*, December 10, 2014, oo uu qoray Joseph Goldstein.

[6] Welsh waa dad ku nool dalal badan oo ay ka mid yihiin: UK, USA, Canada, Australia iwm.

[7] Waxaa sidoo kale la mid ah dibkabayaashan oo la micna ah "-ina": **-s** (Dutch, Irish) **-son** (English, Swedish, German, Norwegian), **-sen**/**-zen** (Danish, , Dutch), **-ic** (Czech, Sorbian, Belarusian), **-oğlu** (Turkish). Iyagoo horkabayaal ahna, oo isla micnihii hore leh, waxaa ka mid ah: **Bin-/Ibn-/Ben-** (Arabic, Hebrew), **Ap-/A*b*-** (Welsh), **Fitz-/Mac-** (Irish), **Pour**- (Persian), **Di**- (Italian, Spanish). Horkabayaal iyo dibkabayaal tilmaama halka uu qofku ka soo jeedo, waxaa ka mid ah: **-i** (Arabic, Persian, Hungarian); **De**- (Italian, French).

[8] Naanaysyada Soomaaliyeed badanaa waxay tilmaamayaan iin jireed ama dabeecadeed oo uu qofka leeyahay, sida: *ilay, gacamay, afqallooc, madaxay, laangare, jinnoole, -waal, shiino* iwm.

[9] Dadka qaarkood waxay caan ku noqdaan magaca aabbaha ama awoowga, oo ah magac aan aad loola bixin, magacaas ayaana aad loogu gartaa, sida: *Maxamed Siyaad Barre (Siyaad), Maxamed Xaaji Ibraahin Cigaal (Cigaal), Cabdalla Cumar Mansuur (Mansuur), Maxamed Xaaji Xuseen Raabi (Raabi).*

[10] Waa magaca qoraa caan ah, Alle ha u naxriistee, isagoo dhammaystiran waa: Yaasiin Cismaan Yuusuf Keenadiid. Qoraagu, sida qoraalladiisa ku cad, magaca awoowgiis, Yuusuf, waa ka booday, arrintaasoo u muuqato in ay tusaale fiican u noqon karto habka aan talo ahaan kor ku soo jeediyay.

[11] Magacyada *Cadde, Siilaanyo, Hadraawi* iyo naanaysyada kale ee aan xumayn, waxay tusaale wacan u noqon karaan naanaysyada laga dhigan karo magacqoys.

[12] Magacu waa *Sh Xasan Axmed Maxamed Cismaan*, *Maxamed* ayaa la oran jiray *Faqi Maxamed Cismaan,* aqoontiisa fiqhiga iyo axkaamta darteed ayaana *Faqi* loogu magacaabay, ka dibna *magacqoyseed* ayuu u noqday tarankiisii.

[13] Naanaysta xirfadda ku tusaysa, qofkuna bulshada dhexdeeda caan ku noqdo, waxaa ka mid ah: *Nuur Biyoole, Xasan Roodhiile, Cali Barafle, Cismaan Cusboole, Cumar Rooti, Cabdiqaadir Tuubiiste, Cabdi Fuundi.*

W/Q Cabdalla Cumar Mansuur
Email amansur44@gmail.com

Tixgelin: Maqaalkan waxa uu horey ugu soo baxay: ***Somali Studies:*** *A Peer-Reviewed Academic Journal for Somali Studies, Volume 2, pp. 125-140, Somali Studies, 2017*

Raadraac

Cabdalla Cumar Mansuur, 2015, "Midaynta iyo Horumarinta Af Soomaaliga", in AFMAAL (tifaf.) Cabdirashiid M. Ismaaciil, Cabdalla C. Mansuur & Saynab A. Sharci (eds.): Afmaal (Taxanaha Darsidda Afka iyo Suugaanta Soomaalida), AGA, Djibouti. b. 17−35.

Abdalla Omar Mansur, 2016, "Language Loyalty – The Case of Somali Language – [Paper Delivered in the 12th Congress of the Somali Studies International Association (SSIA), Helsinki, Finland], lagu daabacday Afrikan Sarvi, Horn of African Journal. http://afrikansarvi.fi/issue10/106-artikkeli/273-language-loyalty-the-case-of-somali-language

Cabdalla Cumar Mansur, 2016, *Taariikhda Afka iyo Bulshada Soomaaliyeed*, daabacaadda 2aad, LoohPress, London.

Joseph Goldstein.2014, "Obstacles Beyond Number for the Afghan Census", December 10, 2014, Kapul Journal.

https://it.wikipedia.org/wiki/Cognome#Storia
https://en.wikipedia.org/wiki/Patronymic
https://en.wikipedia.org/wiki/List_of_family_name_affixes

About This Journal

Somali Studies: *A peer-reviewed academic journal for Somali studies* is a broad scope multidisciplinary academic journal devotes to Somali studies; published annually by the Institute for Somali Studies in print and online forms. ***Somali Studies*** aims to promote a scholarly understanding of Somalia, the Horn of Africa and the Somali diaspora communities around the globe.

Somali Studies provides a forum for publication of academic articles in broad scope of areas and disciplines in Somali studies, particularly focused on the humanities and social science. ***Somali Studies*** appreciates papers exploring the historical background or navigating the

Copyright © 2018 WardheerNews, All rights reserved

contemporary issues; special consideration will be given to issues which are critical to the recovery and rebuilding of Somalia, a country emerging from a devastating civil war.

Institute for Somali Studies (ISOS) is a research centre within Mogadishu University. The Institute aims at knowledge generation through research and analysis on Somalia, Horn of Africa, and the Somali communities in abroad. The institute conducts and coordinates researches, workshops, conferences, discussions and dialogues; and disseminates findings, reports, and analysis through publications and events.

Somali Studies is open access journal and all articles are freely available to read, print and download from the website of the Institute.

Disclaimer: All views and opinions expressed in the article(s) published in ***Somali Studies*** journal are the sole responsibility of author(s) of the article(s). It does not necessarily reflect those of the editors, the Journal, nor the Institute for Somali Studies.

Copyright© 2017 by Institute for Somali Studies All rights reserved

Published by Institute for Somali Studies

Website: www.isos.so - Email: isos@mu.edu.so Tel/Fax: +252 1 858118
Mogadishu,
Somalia Printed in
Somalia